

Tallaalka BCG ee Ka hortagga ah iyo Baaritaanada Cudurka Qaaxada

Haddii aad u baahan tahay baaritaan cudurka qaaxada ah waa muhiim in la ogaado in yaraantaadii aad qaadatay tallaalka BCG. Weli waa uu kugu dhici karaa cudurka qaaxada xitaa haddii lagu tallaalay, gaar ahaan haddii aad hadda tahay qof weyn.



Tallaalka BCG wuxuu qofka ka difaaca noocyada ugu xun ee qaaxada xilliga carruurnimada. Waxtar difaac ah ma lahan markaad qof weyn tahay.



Baaritaanka dhiiga ee cudurka qaaxada. Tallaalka cudurka qaaxada, oo sidoo kale loo yaqaan BCG, wax maka badelo natijada baaritaanka dhiigga. Haddii aad tallaalka BCG qaadatay yaraantaadi, usheeg dhakhtarkaaga in UUSAN isticmaalin baaritaanka maqaarka ee cudurka qaaxada.



Raajada laabta iyo booqashada dhakhaatarka ayaa ah talaabada xigta haddii baadhista dhiiga ee cudurka qaaxada ay muujinayso in aad qabto. Dhakhtarkaagu ayaa go'aamin doona haddii aad qabto qaaxo waxyeelo baahsan leh ama mid aan firfircoonayn.



Gudadaha Maraykanka, Dad badan ayaa qaata daawada qaaxada aan firfircoonayn si ay uga caawiyaan inaysan hadhow bukoon. Wadamada kale waxaa laga yaabaa in aysan bixin daawada cudurka qaaxada ee aanan firfircoonayn. Daawadu waxaa inta badan la qaata muddo 3 ilaa 4 bilood ah.

Dadka qaba cudurka qaaxad firfircoon ayaa dareemaan xanuun oo waxayna jeermiska cudurka qaaxada u gudbin karaan dadka u dhow. Waxaad naga soo wici kartaa 206-744-4579, ikhtiyaarka 1, ama iimayl: LTBI@kingcounty.gov si aad u waydiiso su'aalo.